



# Macluumaaad muhiim ah oo ku saabsan sidii loo soo bogi lahaa maalmihii barafku xiray iskuulada

Waalidiinta Qaaliga ee PPS,

Iyada oo aan rajeyneyno in jawigii cimilada ee adkaa sanad-dugsiyeedkani dhammaaday, waxaan rabnaa in aan idinla wadaagno sidii loo soo bogi lahaa maalmihii barafku dhacay ee iskuulada la xiray. Waxa aan isleenahay in ay muhiim tahay inaan idinla socodsiino wixii cusub ka hor inta aan la galin fasaxa gu'ga.

Waxaa ku taxan jadwalka taariikhda iskuulada ee degmada saddex maalmood oo loogu talogalay in lagu soo bogo marka barafku dhaco (Juun 10-12), maalmahaasi oo si gaara loogu dhigay in marka loo baahdo in la isticmaalo. **Waxa aynu isticmaali doonaa labadaasi maalmood ee Juun 10keeda iyo Juun 11deeda si aan u soo bogno maalmaha barafka.** Labadani maalmood ee lagu kordhaniyo sanad-dugsiyeedka dhammaadkiisa waxa ay ina siin doontaa sidii loo celin lahaa saacadihii waxbarashada ahaa ee ka baaqatay ardayda cimilada awgeed bishii Febraayo.

Marka la eego jadwalada ardayda ka qalin jabineysa fasalada 12naad, waxa aan ku hawlanahay sidii aan xal ugu heli lahayn soo bogista waqtigii waxbarashada waajibka ahayd ee dhaaftay dugsiyada sare – waxa aan la socodsiin doonaa ardayda iyo waalidiinta dugsiyada sare marka qorshahaa aan wadnaa soo dhammaado sida ugu dhakhsa badan.

Sidaas awgeed, waxa aan si dhow ula soconeynaa waxa ay u asteeyeen Ururka Waxbarashada Oregon “Maalinta Ficilka” ee bisha Maayo 8deeda, taasi oo si aan ognahay ay raad ku yeelan karto dhinaca shaqaalaha oo u baahan in maalintaas la xiro iskuulada. Waxa aan rajeyneynaa ugu yaran macalimiinta dugsiyada degmada qaar ka mid ahi in maalintaas Maayo 8deeda ay ka maqnaadaan goobahooda shaqada si ay uga qeybqaataan Maalinta Ficilka oo ka dhici doonta Xarunta Gobolka ee Salem. Haddii sida la saadaaliyey maqnaanshuu gaadho meel aynaan si kalsooni leh oo macno leh u siin karin ardeydeena casharadii waxbarasho iyo amni maalintaas gabi ahaanba, waxa aan ku dhawaaqi doonaan in maalintaas Maayo 8deeda la xiro dugsiyada degmada oo dhan iyo in dib loo soo bogo maalintaas waxbarashada ardayda ka baaqatay fasalada PK-11 bisha Juun 12keeda, iyaga oo fasalada 12naadna maalin badiil ah loo sameeyo.

Go'aanadani qaadashadooda aan tixgalineyno, waxa aan isku dayi doonaa mar kasta in aan baahiyaha ardayda ka hor marino. Waxa aan idiinka mahadcelineynaa sida aad noola fahameysaan iyo dhibirsanaantiina.

Waxaan idii rajeyneynaa idinkoo nabad ah iyo inaad ku nastaa Fasaxa Gu'ga

Dr. Yvonne Curtis

Ku-Xigaha Guddoomiyaha Waxbarashada ee Bulshada Iskuulada iyo Waxbarashada